

GUDDIGA BULSHADA DUGSIGA
WARARKA SHIRKA
Oktoobar 25, 2016
5:30-7:00 pm
Maktabka Riley

Ka soo qeybgaleyaasha: Jose Garcia, Shawna Govero, Heidi Cowan, Brian Conley, Chris Mitchener, Irma Quiroz, Ana Evangelista, Juana Alvarez, Yazmin Serrato, Stephanie Mora, Sarah Farah, Maria Mendoza, Christi Paulson, Heather Bennett, Jim Martin, Ronald Urbin.

Shirka wuxuu bilowday 5:30 pm.

Dr. Martin wuxuu ka qeybgaleyaasha la wadaagay miisaaniyadda dugsiga. Inta badan, waxaan lacagtena ku bixinaa shaqaale dheeraad ah si loo yareeyo tirada ardayda ku jirto fasalka iyo si faragelin loogu sameeyo ardayda u baahan. Waxaa jira xoogaa su'aalo ku saabsan haddii kharashkaan isbaddalay si xisaabta loogu daro natiijadaha imtixaanka dhamaadka heerka sannadkii la soo dhaafay. Dr. Martin wuxuu yiri in inkastoo ay dhici karto in kharashka uusan isbaddalin, waxaan isku daynaa in aan xoojino sida ilahaan loo isticmaalo sannadkaan. Tusaale ahaan, farsamayaqaanka bixiya faragelinta waxay taageero ka helaan tababaraha fanka luqadda xagga shaqada ay la wadaan ardayda. Waxaa jirta xoogaa xiiso ay xubnaha SCC u qabaan tababarka la siiyo waalidiinta si ay caruurtooda ugu kaalmeyaan, tababareyaal ahaan, waxbarashada guriga iyo halkaan dugsiga.

Waxaa jiray xoogaa walwal iyo su'aal laga soo jeediyay ELD. Dr. Martin wuxuu sharaxay in tani tahay English Language Development (Horumarinta Luqadda Ingiriisiga) iyo xattaa ardayda Ingiriisiga ugu hadasha sida luqadooda kowaad in ay u baahan yahiiin iyo in ay helaan taageero dheeraad ah xagga horumarinta luqadda Ingiriisiga. Dr. Martin wuxuu sharaxay in hadalka, dhageysiga, qorista, iyo akhriska muhiim u yahiiin Utah. Dr. Martin wuxuu waalidiinta ku casumay in ay soo booqdaan fasalada ELD si ay u ogaadaan tababarka waxa uu ku saabsan yahay.

Mowduuca xiga oo loo baahan yahay in laga hadlo wuxuu ahaa gardareysiga. Dr. Martin wuxuu ka-qeybgaleyaasha la wadaagay Powerpoint loo isticmaalay in shaqaalaha la baro gardareysiga. Waxaa jiray wada hadal dheer. Waxaa lagu talliyay in dugsiga bixiyo kormeer xooggan waqtiga nasashada, lana kaalmeysto waalidiinta ku shaqeyso iskaa wax u qabso. Waxaa kaloo lagu talliyay in la soo aruuriyo koox arday oo saaxiib la noqda caruurta dibadda ku cayaarta iyo sugta ammaanka ardayda waqtiga nasashada.

Xubnaha SCC waxay weyddiiyeen in guriga loo diro xasuusin ku saabsan sida waalidiinta u kaalmeyn karaan gardareysiga. Xubnaha SCC waxay weyddiiyeen in caruurta la xasuusiyo in ay muhiim tahay in ay soo sheegaan gardareysiga marka ay arkaan ama

marka ay iyaga naftooda la kulmaan – waa in la siiyo kalsooni in tani tahay hagaag iyo in loo baahan yahay.

Xubnaha SCC waxay kaloo dareensan yahiin in ay muhiim u tahay waalidiinta in loo yeero iyo in laga qeybgeliyo hawsha marka lala kulmo dhacdooyin ku saabsan gardareysiga. Waxay muhiim u ahayd SCC in waalidiinta gardaroolaha iyo waalidiinta dhibanaha labadaba lagu daro wada hadalka ku saabsan xalka.

Waalidiinta qaar waxay soo jeediyeen in ay walwal ka qabaan injirta dugsiga. Waxaa la sharaxay in ardayda qabta cayayaanka nool in aan loo ogolaanin in ay joogaan dugsiga. Hase ahaatee, ardayda qabta injirta ama ukumanka waa loo ogol yahay in ay yimaadaan dugsiga. Marka lala kulmo xaaladda injirta fasalka, waalidiinta waxaa lagu ogeysiiyaa xasuusinta loo diro guriga. Dr. Martin wuxuu hubin doonaa siyaasadda la xariirta injirta kaddibna wuxuu soo gudbin doonaa warbixin.

Waxaa laga hadlay arrinta ku saabsan labbiska. Waxaa la dareensan yahay in midabka dambasta lagu daro siyaasadda labbiska. Qodobkaan waxaa ku soo noqon doono SCC marka la gaaro shirka xiga. Kaddib marka la gaaro go'aanka SCC, waxaa loo baahan yahay in la hor dhigo bulshada balaaran si aay waxu ugu daraan, waxna laga baddalo siyaasadda.

Ms.Mendoza wuxuu qof kasta xasuusiyay in aan dib u cusboneysiino labbiska. Waxaan jecelnahay in aan kaa qaadano labbiska aad sida jilicsan u isticmaashay, kaddibna siino qoys kale. Haddii aad u baahan tahay labbis, Maria Mendoza waxay haysaa qaar si jilicsan loo isticmaalay, waxaa laguugu soo dhaweynaayo in aad timaadid kaddibna qaadatid.

Waxaa timid Kathleen Christy oo ka socota waaxda sinaanta, waxayna ka hadashay qorshaha sinaanta Riley kaasoo xoogga saara English Language Learners (ELL – Ardayda Barata Luqadda Ingiriisiga), heerka 1aad iyo 2aad. Waxaan qabnaa tababare oo taageero siiya macalimiinta kaalmeysa ardayda ELL. Waxaan kaloo fiirinay siyaabaha qoysaska looga qeybgeliyo dadaalkena hagaajinta. Ms. Christy waxay Jenny Mayer-Glenn oo ka tirsan xafiiska dagmada kala hadashay kooxda horseedka, taasoo u ogolaan doonto waalidiinta cod xagga qorshaha ka-qeybgelinta qoyska.

Shirka waxaa la soo gabagabayay 7:00 pm. Shirka xiga waxaa la qaban doonaa Isniin, Nofeembar 28, marka ay tahay 5:30 pm. Qoraalka ku saabsan qodobada aga hadlay shirka, waxaa qoray Jim Martin.